

# Kuraasta Kor-u-Qaadka ah (Kuraas Buustar)

## Waa maxay kursiga kor-u-qaadka ah (kursi buusterka)?

Kursiga buusterku waa kursi baabuur aan lahayn xakamayn. Wuxuu kor ugu qaadaa ilmaha si suunka dhexda (dhabta) iyo garabka la mariyo uu si fiican ugu le'egaado. Waxay carruurta kursiga buusterka u isticmaalaan marka ay ka koraan kursiga baabuurka laakiin ayna wali gaarin heer ay ku isticmaalaan suunka kursiga dadka qaan-gaarka ah. Suunka kursiga ee aan si fiican u le'egeyn ilmahaaga ayaan ka ilaalin karin waxyeellada haddii u shil dhaco.

## Goorma ayuu ilmahaagu diyaar u noqon doonaa kursiga buusterka?

Ku hay ilmahaaga kursi baabuur hore-u-jeed ah oo xakamo 5-dhibco leh illaa u ilmuhu gaarayo xadka dhererka iyo xadka sare ee miisaanka loo oggol yahay kursi baabuurkaas (ka fiiri tilmaamaha ay ka bixineyso warshadda soo saartay). Markay ka weynaadaan kursigooda baabuur ee hore-u-jeedka ah, waxa lagu qaadi karaa kursi buuster ah (kor-u-qaadka ah). Ilmahaagu waa inuu ugu yaraan noqdaa 40 rodol kahor intayna isticmaalin kursiga buusterka.

Gobolka Washington gudahiisa, waa sharci inay carruurta lagu fadhiisiyo kursiga kor-u-qaadka ah (buusterka) illaa uu ka gaarayo 8 jir, ama uu dherarkiisu noqonayo 4 fiit iyo 9 inji (57 inji). Carruurta dadoodu ka yar tahay 13 jirka ah waa in lagu qaado baabuurka kursiga dambe markay suurtagal tahay.

## Ma isticmaali karaa kursi buustar kalaiya leh suunka dhexda?


Maya. Kuraasta buusterka ayaa waajib ah in had iyo jeer lagu isticmaalo suunka dhexda (dhabta) iyo garabka. Waligaa ha isticmaalin mid kaliya leh suunka-dhexda.

- Haddii boos fadhiga dhexe ee kursigaaga xagga dambe leeyahay suunka-dhexda-kaliya, ku meelee buustar dhinaca xiga oo ay tahay in loo isticmaalo suunka dhexda iyo ka garabkaba kursiga buustarka.
- Haddii aadan ku lahayn suun dhexda iyo garabka loo isticmaali karo kursiga dambe, waxaa ku isticmaali karta buustarka kursiga hore iyo suunka dhexda iyo garabka ku yaal. U riix kursiga hore xagga dambe illaa inta aad kartid. Haddii u baabuurkaagu leeyahay bacda hawada, dami.
- Haddii aad ka maarmi weydo inaad isticmaasho kaliya suunka dhabta, waa inaad ilmahaaga ugu xidho si adag meel hoose oo miskaha ah.




## Maxaa noocyo kuraasta buustarka ah ee jira?

- Kursiga buustarka ah ee **aan qaybta dhabarka lahayn** waxaa loo isticmaali karaa kuraasta dambe ee leh meesha madaxa lagu tiiriyo. Haddii ilmahaagu uuna si fiican ugu tiirsan karin meesha madaxa lagu tiiriyo si loo ilaaliyo madaxooda iyo qoortooda, markaa isticmaal kursi buustar xag-dambe oo sare leh.
- **Buustarka xag-dambe oo sare leh** ayaa loo isticmaali karaa baabuurta leh ama aan lahayn meesha madaxa lagu tiiriyo.



Buustarka aan dhabarka lahayn



Buustarka dhabarka sare leh

### Ogow wax ka sii badan

- [www.800buckleup.org](http://www.800buckleup.org), 425-828-8975 ama 800-282-5587
- [www.carsafekids.org](http://www.carsafekids.org)
- [www.safercar.gov](http://www.safercar.gov)
- [www.seattlechildrens.org](http://www.seattlechildrens.org)
- Daryeel Bixiyaha Ilmahaaga

Seattle Children ayaa macluumaadkan ka dhigi doonta in lagu helo qaab kale marka la weyddiisto. Uga wac Isgaarsiinta Suuqaynta taleefanka 206-987-5205.

Xaashidan ayay dib u eegeen shaqaalaha rug caafimaadeedka Seattle Children. Hase yeeshe, baahida ilmahaaga ayaa mid u gaar ah. Ka hor intaadan ku dhaqaaqin ama aadan isku hallayn macaluumaadkan, fadlan kala hadal daryeel-caafimaad bixiyaha ilmahaaga.

© 2004, 2007, 2010, 2011, 2014 Seattle Children's Hospital, Seattle, Washington. Dhammaan xuquuq dhowran.